Foomka Xulashada Spirit of Portland

Golaha Deegaanka Magaalada Portland waxa uu soo bandhigaa Abaalmarinta Spirit of Portland sanadka kasta kuwaas oo la siiyo shakhsiyaadka iyo hay'adaha wax kusoo kordhiyay bulshada. Fadlan soo xul qof, ganacsi, hay'ad, xaafad, ama urur ganacasto kuwaas oo abuuray mashruuc, adeeg ama munaasabad lagu taageerayo bilicda Portland! Xulashada waxaa lagu aqbalayaa luuqadda qofku u dhashay.

Sida loo xulayo?

Tallaabada Koowaad: Na sii macluumaad kugu saabsan iyo cidda aad ku magacaabayso foomkan

Tallaabada Labaad: Ka jawaab su'aalaha shuruudaha ee kusaabsan cida lasoo xulay iyo shaqada uu bulshada ka dhex hayo

Tallaabada Saddex: Foomkan oo jawaabahaagu ku qoran yihiin u soo gudbi Xafiiska Bulshada iyo Nolosha Madaniga ah.
(macluumaadka xidhiidhka ee hoose).

Xasuusnaw:

- Dadkii abaalmarinaha la siiyay 10 sano ee la soo dhaafay waa inaan la soo xulin
- Dadka abaal marinta la siinayo waxaa lagu xulanayaa qaybo kuwaas oo ku yaal bogga xiga.
- U door hal qayb oo kaliya qofka ama kooxda aad magacaabayso.

Macluumaadkaaga:

Magaca: _____

Iimayl: _____

Telefoonka: _____

Cinwaan, Zip: _____

Macluumaadka kusaabsan shakhsiga ama kooxda aad soo xushay:

Ciddaad xulatay: _____

Qaybta: _____

Iimayl: _____

Telefoonka: _____

Cinwaan, Zip: _____

WAKHTIGA AY KU EEG TAHAY SOO XULIDU WAA TALAADADA, JULAAY 30keeda, 2019

Haddii aad doorbidayso inaad ku dirto boosta, iimeyl ama faakas foomka magacaabista ee la buuxiyay, u dir:

Office of Community & Civic Life, Attn: SOP
4747 E Burnside St. Portland, Oregon 97215
Iimeelka: spiritofportland@portlandoregon.gov
Fakis: 503-823-2909

Su'aalo: Marco Mejia lambarka 503-823-8548 ama spiritofportland@portlandoregon.gov

Sharaxa Qaybaha Abaalmarinaha Spirit of Portland 2019

2019 waa sanad-guuradii 35aad ee Spirit of Portland Awards, markaa waxaanu dooranay halkudhegga inuu la xidhiidho Qorshaha Dhammaystiran ee 2035 ee Magaalada Portland. 5 mabda' ee qorshuhu waxay hagaan 5 qaybood marka la eego cida lasoo xulay sanadkan. Qaybahani waxaa lagu aqoonsadaa qof kasta oo noqon kara hoggaamiye, oo waxtarkiisa goonida ah darteed uu awood u leeyahay inuu wax ka beddelo bulshadeena. Abaalmarinaha Spirit of Portland Awards waxaa lagu aqoonsadaa geesiyada deegaanka, iyo saamaynta waxqabadkoodu ku yeesha abuurista mustaqbal la wadaago ee magaalo aynu dhammaanteen wadaagno. Magaaladu dad ayay ka samaysan tahay, markaa soo xul kuwa ka caawiyay Portland inay bilic yeelato! Xulashada waxaa lagu aqbalayaa luuqadda qofka.

Qaybaha abaalmarinaha Spirit of Portland Awards 2019 waa:

Barwaaqada Dhaqaale:
Waxa lagu aqoonsadaa shakhsiga iyo/ama urur shaqadiisu wax ka tartay, abuurtay oo taageertay dhaqaale kaarboonkiisu yar yahay iyo sidoo kale xoojinayso koriinka shaqaalaynta, tartami ogidda iyo barwaaqo qoysaska oo dhami u siman yihiin.

Caafimaadka Aadanaha:
Waxa lagu aqoonsadaa shakhsi iyo/ama urur shaqadiisu caawiso ka fogaanshaha ama yaraynta saamaynaha caafimaad ee taban oo horumariso fursadaha dadka reer Portland ay ugu horseedayso nolol caafimaad leh oo firfircoon.

Caafimaadka Deegaanka - Ilaalinta Deegaanka Sandy Diedrich:
Waxa lagu aqoonsadaa shakhsi iyo/ama urur shaqadiisu isku lammaanayso dabeecadda iyo magaalada oo xoojiyay caafimaadka deegaanka kaasi oo taageera dadka, xaafadaha, kalluunka iyo duurjoogta. Waxa lagu aqoonsaday qiimaha dabiiciga ah ee nolosha dabiiciga ah iyo taageeridda adeegyada bee'ada ee hawada, biyaha iyo dhulka Portland.

Sinnaanta:
Waxa lagu aqoonsadaa shakhsiga iyo/ama ururka shaqadiisu sare u qaaddo sinnaanta iyo caddaaladda deegaanka iyagoo yaraynaya faraqa, hoos u dhigaya culaysyada, kordhiya faa'idooyinka bulshada, kordhinaya xaddiga guryaynta jaban, si togan u kordhinaya guryaynta dhexdhexaadka ah, si horusocodnimo leh ula dagaalama barakaca, oo horumariya fursadaha bulsho-dhaqaale ee dadka adeega iyo matalaad ku filan aan helin. Sidoo kale waxa kujira kuwa si ku talogal leh ula shaqeeya dadka aan adeeg iyo matalaad ku filan aan helin marka la eego go'aanada saameeya iyaga ama si gaar ah u aqoonsada, wax uga qabta oo uga hortaga soo noqnoqodka caddaalad darrada ku dhacaysa bulshooyinka aan caddaanka lahayn dhammaan taariikhda Portland.

Adkaysiga:
Waxa lagu aqoonsadaa shakhsi iyo/ama urur shaqadiisu wax ka tartay yaraynta halisaha oo horumarisay awoodda shakhsiyaadka, bulshooyinka, nidaamyada dhaqaale, iyo deegaanada dabiiciga ah iyo kuwa la sameeyey si ay ugu adkaystaan, uga soo kabtaan, oo ula qabsadaan isbeddelada ka imanaya masiibooyinka dabiiciga ah, dhibaatooyinka dadku sababta u yihiin, isbeddelka cimilada, iyo isbeddelada dhaqaale.

Fadlan ka jawaab su'aalaha la rabo ee soo socda, jawaabahaagu ha koobnaadaan:

1- Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay, kafaaloqaaday oo/ama adeeg siiyey dadaal mashruuc/bulsho kaasi oo sare u qaadaya sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo u dhannaanshaha?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

2 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo muujinaya jajabnaan, iyo/ama halabuurnimo, si gaar ah ula xidhiidha sare u qaadidda fanka, farshaxanka iyo dhaqanka?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

3 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo muujinaya jajabnaan, iyo/ama halabuurnimo oo uu sare u qaadayaa kaqaybgalka iyo kaqaybqaadashada shacabka?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

4 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo sameeyay wacyi gelin dhaqamada oo dhan?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

5 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo sare u qaadaya oo difaacaya xuquuqda bulshooyinka lagu shaqaysto, la yarayso, la takooro oo la cadaadiyo?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

6 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo sare u qaadaya oo taageeraya bulshooyinka caado ahaan dulman oo aan matalaad ku filan helin?
H_ M_
- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

7 - Miyaa cida lasoo xulay (qof ama koox) gacan ka gaysatay ama kafaaloqaaday mashruuc kaasi oo muujiyey dadaal aad u badan oo ku aadan baahiyaha iyo danaha muhiimka ah ee bulshada?
H_ M_

- Haddii ay Haa tahay, ma xusi kartaa dadaal mashruuc/bulsho iyo doorka cidda la magacaabaya ay ciyaartay?

“Magaalada Portland waxay xaqiijinaysaa in si wax-ku-ool ah loo heli karo barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha magaalada si loogu hoggaansamo Xuquuqda Madaniga ah ee shuruucda Title VI iyo ADA Title II, waxaana macquul ah inay bixiso: turjumaadda qoraalka, turjumaadda hadalka, wixii wax laga beddelayo, waafajinaha, qaabab kale, kaalmada iyo adeegyada dheeraadka ah. Si aad u dalbato adeegyadan, la xidhiidh 503-823-3093, Magaalada TTY 503-823-6868, Adeegga Gudbinta: 711.”